



MINNEAPOLIS
PUBLIC SCHOOLS

Urban Education. Global Citizens.

1250 West Broadway Ave.
Minneapolis, Minnesota 55411
Phone: 612.668.0140
Fax: 612.668.0145

Cecilia Saddler
Associate Superintendent, High Schools

February 20, 2015

Qoysaska qaaliga ee Wellstone High School,

Waxaan idiin ku soo qorayaa warqadan si aan idiin la wadaago isbedel ka jira Wellstone sanad dugsiyeedka 2015-16 kaas oo noo ogolaanaya inaan si fiican ugu adeegno ardaydeena.

Maaddaama ay kor u kacday diiwaangalinta ardayda Roosevelt, oo aan qorshaynay isbadal ku aadan barnaamijka Wellstone si aan u daboolno baahida ardayda, Dugsiga Wellstone waxaa uu u guuri doonaa dhismaha Wilder ee ku yaalla 3345 Chicago Ave. S., dugsigu waxa uu u adeegi doonaa ardayda da'doodu tahay 17-21 wixii ka bilaama Aug. 15. Wellstone waxaa dib ugu noqon doonaa hadafkiisa asalka ahaa: Barnaamijyo xoogga saaraya baahida ardayda waa-weyn oo leh tayo sare si loo dardar galiyo u diyaar noqoshada jaamacad iyo xirfad. Ardayda da'da weyn waxay ka qayb qaadan doonaa waxbarasho adag oo loogu talagalay in loo diyaariyo kulliyad iyo xirfado iyo in la dardargaliyo horumarka luqadda Ingiriisiga. Waxay wax la baran doonaan facooda oo ay isku da' yihiin sida shaqo barasho, iskaashi bulsho iyo fursadaha waxbarasho sare.

Ardayda hada da'doodu tahay 14-16 wixii ka bilaama Aug. 15 waxay gali doonaan barnaamij cusub ee Dugsiga Sare ee South ama ay u wareegi doonaa dugsiga sare oo ku yaala xaafadooda, waxay ku xirnaan doontaa heerka aqoon u lahaanshaha luuqada Ingiriiska. ardaydu waxay yeelan doonaa xulasho dheeraad ah, waqti dheeraad ah oo ay u helaan facooda ingiriisada uga hadala si faseex ah iyo fursad ay ku heli doonaan manhajka dugsi sare oo dhamaystiran. Ardayda iyo qoysaska waxay heli doonaan taageero shaqsi ahaaneed si loo go'aamiyo dugsiga ku haboon.

Ardaydu waxay sii wadan doonaan helida iyo istimcaalida kaarka gaadiidka dadweynaha (Metro Transit). Waxaan la shaqayn doona adiga iyo cunugaagba si loo hubiyo in wadada baskaagu marayo ay sax tahay.

Shaqaalaha Dugsiga ayaa kula xiriiri doona si toos ah si ay u eegaan xaaladda u gaarka ah ee qoyskaaga, lana hubiyo in baahida ardayga waxaa laga qabtay. Haddii aad qabto wax su'aalo ah ama walaac ah, fadlan igala soo xiriir 612.668.0140. Waad ku mahadsan tahay ka qayb qaadashada joogtada ah ee waxbarashada cunugaaga.

Daacadnimo,

Cecilia Saddler
Ku Xigeenka Karmeeraha Guud ee Dugsiyada Sare